

# Sidee qof xaq loogu tirin karaa Ilaah hortiisa?

Musliimiinta waxay dhahaan: 5 tiirarka ee shareecada Islaamka qof xaq buu noqon karaa Ilaah hortiisa.

Haddaad sharicga dhawrto, qof xaq miyaad noqon kartaa?
Rooma 3:19 oo qayb ka mid ah Injiilka wuxuu ku leeyahay: “waanu ognahay in wax alla wixii sharcigu yidhaadho, uu ku leeyahay kuwa sharciga ku hoos jira, in af kasta la xidho, oo dunida oo dhammu masuul ugu noqodo ilaah hortiisa.”
Ujeedada sharciga waa inuu af kasta la xidho. Sababta? Sharcigu Ilaah wuxuu muujinayaa dembiga.

Kuwa kale way dhahaan: 10ka Amaradii muuse soo raac.
Galatiya 3:10 waaxaa ku qoran: “laakin kuwii shaqada sharciga isku haleeyaa oo dhan inkaar ayay ku hoos jiraan, waayo waxaa qoran, “waxaa inkaaran mid walboo aan adeecin waxyaalaha kitaabka sharciga ku qoran oo dhan."
Kuwiina isku haleeysaan shareecada: waa inaad dhammaysto sharceeda...

Sharciga wuxuu ku leeyahay: “waa inaadan been sheegin.” Weligeed been miyaad sheegtay?
Sharciga wuxuu ku leeyahay: “waa inaadan damcin waxa deriskaagu leeyahay oo dhan.” Weligeed miyaad damacysay hantiyada deriskaaga?
Sharciga wuxuu ku leeyahay: “Waa inaadan naag damac leh u eegin.” Weligeed naag damac leh ma eegtay?

Sharciga wuxuu ku leeyahay:  “Waa inaadan magaca ilaah si been ah u isctimaalin.”
Imise jeer ayaad tidhi: ‘walaahay...’
Sharciga wuxuu ku leeyahay: “waa inaadan ilaahyo kale lahayn Isaga mooyaane.” Weligeed lacag ma hordhigtay ilaahay? taas waa ilaahaada.

Kuwiina isku haleeyaa sharciga inaad noqodo qof xaq ah… Su’aal baan qabaa, sharciga ma dhammaystiray? Galatiya 3:10 waxaa ku qoran “waxaa inkaaran mid walboo aan adeecin waxyaalaha kitaabka sharciga ku qoran oo dhan."
Kuwiina isku haleeyaa sharciga, sharciga laftiisa ayaa ku xukumi doona maalintii qiyaamada.

Sharciga ayaa inoo muujinayaa dembiga. Kaakin sharciga awood ma haysato inuu ku babaadiyo.
Maxbuuska markuu xidhnaa khamiis cadaan, dabeecadiis ma beddelayaa?

Maanta su’aashii waa kan: sidee qof xaq loogu tirin karaa ilaah hortiisa?
Mid wuxuu jawaabay, ‘sharceeda.’
Maya. Sida qoran. “shaqada sharciga ninna xaq ku noqon maayo ilaah hortiisa, waayo, sharciga ayaa lagu gartaa dembiga.”
Sharciga waa sida murayaad oo kale. Waxay ku tusaysaa inaad wasakh tahay…

Aan ku biloowno nebi ibraahim. Siduu xaq u tiriyay ilaah hortiisa? Tawreed Muuse oo Kitaabka Bilowgii 15:6, Ilaah ballan wuu bixiyay Nebi Ibraahim. Nebi Ibraahim muxuu sameeyay? Waxaa ku qoran: “Rabbiga wuu rumaysatay, Ilaahna taas wuxuu ugu tiriyay xaqnimo.”

Nebi ibraahim xaq ma loogu tiriyay shaqada sharciga mise Iimaankiis?
Iimaankiis waxa uu badbaadiyay. Waxaa qoran: “Rabbiga wuu rumaysatay, Ilaahna taas wuxuu ugu tiriyay xaqnimo. Ilaah ballan wuu bixiyay u Nebi ibraahim, wuu rumaysatay ballankii oo waa loogu tiriyay xaqnimo.

Haddaba ballankan waa maxay?
Maxaa u nebiyadu hore xaq loogu tiriyey markay rumaysteen ballankii?
Ballankii waa kan, waxaa ku qoran Galaytia 2:16: “waan ognahay in uusan qofku xaq ku noqonaynin shaqada sharciga, laakiin uu mid xaq ah ku noqonayo iimaanka uu ku qabo yeshuuca masiix. sidaa darteed anaga waxaan iimaankeena saarnay yeshuuca masiix sii aan kuwa xaq ah ugu noqono iimaanka aan masiixa saaranay darteed, oo aan ahayn shaqada sharciga. waayo, shaqada sharciga qofna kama dhigayso mid xaq ah.”

Ballankii waa kan, ku alla kii Yeshuuca Masiix rumeeya, xaqnimada Ilaah wuu heli doona, bilaa camal. In kastoo u ahaa dembiile ugu wayn dunida, Yeshuuca Masiix wuxuu yidhi, “Ii

kaalay, kuligiin kuwiina daalan oo culeyska wadow, waana idiin nasin doona, oo naftiina nasashow aad heli doontaa.

Meel kale Injiilka dhexdiisa waxa qoran:
“Waayo ilaahay dunida jacayl u qaba darteed ayuu siiyay wiilkiisa keliga ah, si mid walbo isaga rumaystaa uusan halaagmin balse u lahaan doona nolosha weligeed ah.”
“Waan ognahay in uusan qofku xaq ku noqonaynin shaqada sharciga, laakiin uu mid xaq ah ku noqonayo iimaanka uu ku qabo Yeshuuca Masiix. Sidaa darteed anaga waxaan iimaankeena saarnay Yeshuuca Masiix sii aan kuwa xaq ah ugu noqono iimaanka aan Masiixa saaranay darteed, oo aan ahayn shaqada sharciga. waayo, shaqada sharciga qofna kama dhigayso mid xaq ah.”

Ku alla kii Rabbiga Yeshuuca Masiix rumaysto, Ilaah wuxuu ninkaas ku tirin doonaa xaqnimadiisa, waayo qof xaq waa loogu tirin doona Ilaah hortiisa xagga rumaysadka Yeshuuca Masiix keliya, oo ma aha shaqada sharciga.